# Arjiga Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore - Pathway II

## Tilmaamaha

### Waa Maxay Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore?

Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore- Pathway II waxay ka caawin karta in ilmahaagu dhigto goobta xanaanada daryeelka caruurta iyo waxbarashada hore oo tayo sare leh si aad uga caawiso ilmahaaga inuu diyaar u noqdo kindergarten. Barnaamijka wuxuu u qalmaa in la siiyo deeqda maalgelinta haddii uu haysto qiimeynta Afar-Xiddig ee Parent Aware. Parent Aware waa qalab qiimayn ah oo ka caawinaysa waalidiinta inay doortaan barnaamijyada daryeelka carruurta (child care) oo tayo sare leh. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [bogga Parent Aware](ParentAware.org) (ParentAware.org). **Xasuusin:** Caruurta waxaa lasiin karaa oo kaliya hal deeq waxbarasho 12 bilood gudahood oo isku mar lama wada siin karo deeqda waxbarashada Pathway I iyo Pathway II.

### Halkee ilmahaygu ku isticmaali karaa deeqda waxbarasho?

Deeqaha Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore - Pathway II waxaa la siiyaa qoysaska iyadoo uu bixinayo barnaamij u qalma oo haysta qiimeynta Parent Aware ee Afar- Xiddig. Barnaamijka Pathway II ee Waxbarashada waqtiga waxay deeqda maaliyada ka helaan Waaxda Waxbarashada Minnesota. Barnaamijyadani waxay markaa u isticmaalaan lacagta si ay u siiyaan deeq waxbarasho qoysaska carruurtoodu dhigato barnaamijka Pathway II. Deeqda waxbarasho waa in lagu isticmaalo barnaamijka bixinaya abaalmarinta Pathway II. Maalgalintu waxay la sii joogaysaa barnaamijka si loogu taageero carruurta kale haddii ilmahaagu uu ka baxo.

### Ilmahaygu ma u qalmaa?

Carruurtu waa inay buuxiyaan shuruudaha xaq u yeelashada da'da ugu yaraan hal qayb oo hoos ku taxan wakhtiga la siinayo deeqda. Carruurtu waxay ka waynaadaan xaq u yeelashada Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Carruurnimada Hore (a) maalinta ay u qalmaan kindergarten (da'da 5 sano bisha Sebtember 1), ama (b) maalinta ilmaha loo diiwaangeliyo oo uu xaadiro kindergarten, hadba kii soo horeeya . Marka ilmaha la siiyo deeq waxbarasho, waxay xaq u leeyihiin inay sii wadaan qaadashada deeqda waxbarasho illaa ay ka waynaanayaan.

- Carruurta da'doodu tahay 3 illaa 4 sano bisha Sebtember 1 ee sannad-dugsiyeedka hadda, ama da'da 5 sano haddii aysan weli u qalmitaanka ka weynaanin.
- Carruurta da'doodu tahay 0 ilaa 4 sano bisha Sebtember 1 ee sannad-dugsiyeedka hadda, ama da'da 5 sano haddii aysan weli u qalmitaanka ka weynaanin, ee buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Waalidka ilmaha ayaa ka yar da'da 21 jir isla markaasna hadda ku jira dugsi sare ama dibloomada iskuulada guud (GED®). Waa inaad keentaa caddayn qoran oo ah ka qayb qaadashadaada hadda oo ku qoran warqada rasmiga ee goobta aad wax ka barato*; ama
- Haddii uu ilmuhu ku jiro xanaanada kumeelgaarka ah (foster care) adeegyada ilaalinta caruurta (protective services)*; ama
- Qoysku haddii ay la kulmeen hoy la'aan 24kii bilood ee lasoo dhaafay*; ama
- Ilmuhu uu leeyahay walaal la siiyay deeq waxbarasho oo uu ku jira isla barnaamijka, haddii loo heli karo miisaaniyad. Arjiyada loogu talagalay walaalaha u qalmaa uma baahna caddaynta u qalmitaanka dakhliga.

***Xusuusin: Mudnaanta siinta deeqda waxbarasho waxaa la siiyaa carruurta buuxisa shuruudaha u qalmidda ee lagu calaamadiyey xiddigta (*).** Qoysasku waa inay sidoo kale buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka dakhliga ka-dib marka ay buuxiyaan ugu yaraan mid ka mid ah shuruudaha kore. Deeqda waxbarasho waa la bixinayaa ilaa inta la hayo lacagta deeq waxbarasho.

## Shuruudo dheeraad ah

Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee ilmaha/carruurta oo kaliya ayaa codsan kara Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore - Pathway II, qoyskaaguna waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- **Deegaanka:** Waa inaad haysataan cinwaan Minnesota ah (aad ku nooshahay gobolka Minnesota).
- **Dakhliga:** Waa inaad haysataa dakhliga qoyska oo u dhigma ama ka yar 185 boqolkiiba heerka saboolnimada ee federaalka ama aad qaadato gargaar dadwaynaha oo ka mid ah barnaamij la ansixiyey ee gobolka ama federaalka.

**Shaxda hoose waxay ku salaysan tahay tilmaamaha heerarka saboolnimada ee lagu daabacay Diiwaanka Federaalka** Janaayo 12, 2022 waxayna ansax tahay abaalmarintu laga bilaabo Luulyo 1, 2022 illaa Juun 30, 2023.

| Tirada Qoyska | Dakhliga guud | Tirada Qoyska | Daqliga Guud |
|---|---|---|---|
| 2 | $33,874 | 6 | $68,802 |
| 3 | $42,606 | 7 | $77,534 |
| 4 | $51,338 | 8 | $86,266 |
| 5 | $60,070 | 9** | $94,998 |

**Qoyskii ka badan sagaal xubnood, ku dar **$8,732** xubin kasta oo dheeraad ah.

## Sideen u Dalbadaa Deeqda Waxbarasho ee Waxbarashada Waqtiga Hore?

1. Qalin buluug/madow ah ama elektanoonik ahaan ku buuxi arjiga. Macluumaadka loo baahan yahay waxaa lagu calaamadeeyey xiddig.
    - Haddii ilmuhu ku jiro xannaanada korinta (foster care), hay'adda adeega bulshada ee degmada ama qabaa'ilku waa inay dhammaystiraan oo saxiixaan arjiga. Waalidka xanaanada korintu (foster parent) si toos ah uma dalban karaan deeq waxbarasho.
2. Ku soo lifaaq dukumentiyada loo baahan yahay si aad u muujiso u qalmitaankaaga. Eeg Bogga 4 ee shuruudaha Xulashada 1 (Caddaynta in aad ku jirto barnaamij dowladu maalgelisay) ama Xulashada 2 (Caddaynta dakhliga).

- Haddii aad ku codsanayso u qalmitaanka in aad tahay waalid ka yar 21 sano jir, qofka codsanayaa waa inuu keenaa caddayn qoraal ah oo ku saabsan in kuu ku jiro qaadashada dibloomada dugsiga sare ama GED® oo ku qoran warqada rasmiga ah ee iskuulka aad ka qaadanayso fasalada ee aad adiga waalidka ah dhigato.

3. Akhri Heshiiska si aad ugu Hogaansanto Shuruudaha iyo Digniinta Tennessen.
4. Qalin buluug/madow ah ama saxeex elektanoonik ahaan ku saxeex oo taariikhda ku qor arjiga.
5. U soo dir arjigaaga asalka ah barnaamijka Pathway II adiga oo raacaya tilmaamaha lagugu siiyay qaybta hoose ee Liiska Hubinta Arjiga ee bogga soo socda.

*Foomkan waxaa samaysay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota mana aha in wax laga beddelo ama la sinaba loo hagaajiyo.*

*Maalgelinta waxaa bixisay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyadoo la adeegsanayo maaliyada gobolka si ay u taageerto maamulida barnaamijyada deeqda waxbarashada ee waxbarashada waqtiga hore, Minnesota Statutes, section 124D.165.*

## Liiska Hubinta Arjiga

☐ **Dib u fiiri liistada hoose si aad u hubiso inaad haysato wax kasta oo aad u baahan tahay arjigaaga:** Buuxi dhammaan qaybaha loo baahanyahay ee arjiga. Qaybaha lagu calaamadeeyey xiddig (*) waa loo baahan yahay. Dhammaan macluumaadka kale waa ikhtiyaari.

☐ Foomkan qalin buluug/madow ah ama elektanoonik ahaan ku buuxi.

☐ Si taxaddar leh u akhri qodod kasta oo heshiiska ah si aad ugu **Hogaansanto qaybta Shuruudaha** iyo **Digniinta Tennessen.**

☐ Qalin buluug/madow ah ama elektanoonik ahaan ku saxeex oo taariikhda ku qor arjiga.

- *Ikhtiyaari:* Akhri heshiiska ku saabsan ka-qaybgalka qiimeynta oo ku qor xarfaha magacaaga u horeeya si aad u bixiso ogolaansho.

☐ Ku soo lifaaq dhamaan dukumentiyada taageeraya oo dhan arjiga xagiisa dambe. Dukumiintiyada taageeraya waxaa ka mid ah:

- Xulashada 1 (Option 1): Dukumentiyo muujinaya in aad hadda ka qayb qaadato mid ka mid ah barnaamijyada dowlada ee la ogolyahay ee ku taxan bogga 5.
- Xulashada 2 (Option 2): Dukumentiyada dakhliga oo ay la socoto *Xulashada 2 Foomka Caddaynta Dakhliga* ee bogga 6 ee arjiga.
  - Haddii xubnaha qaangaarka ah ee qoyska midkoodna uusan lahayn wax dakhli ah, waa in foomka *Caddaynta Dakhli La'aanta (Household Declaration of No Income)* ee ku yaal Bogga 15 uu soo buuxiyo hal qof oo qaangaar ah oo qoyska ka mid ah oo lasoo raaciyo arjigaaga.
- Haddii aad tahay waalid ka yar 21 sano jir oo aad ku jirto qaadashada dibloomada dugsiga sare ama GED®, waa in aad keento caddeyn qoraal ah oo ku qoran warqada rasmiga ah ee iskuulka aad ka qaadanayso fasalada ee aad adiga waalidka ah dhigato.

☐ U soo dir arjiga dhamaystiran, oo la saxiixay oo ay dukumiintiyada u qalmitaanku ku lifaaqanyihiin barnaamijka Pathway II ee hoos ku liistaysan.

☐ Hayso ugu yaraan hal koobi oo ah arjiga iyo lifaaqyada si aad u haysato caddayntaada.

## Soo dir Arjiga

U soo dir arjigaaga dhameystiran iyo dukumintiyada u qalmitaanka barnaamijkaaga Pathway II:

*Dukumentiyada maqan sida Caddaynta ka qaybgalka barnaamijka ama dakhliga, ama saxiixyada maqan ayaa sababi kara dib u dhac.*

**Box is for Administrator Use Only:**
Program Name:____________________
Application Fiscal Year:____________________

# Arjiga Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore - Pathway II

Foomkan qalin buluug/madow ah ama elektanoonik ahaan ku buuxi. Macluumaadka lagu calaamadiyey xiddig (*) waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan waalidka/mas'uulka. Haddii wax su'aalo ah laga tago iyada oo bannaan, waalidka/mas'uulka ayaa looga baahan doonaa in ay soo saxaan.

## Macluumaadka Ilmaha

Nasii macluumaadka dhammaan carruurta aad rabto in loo tixgeliyo deeqda waxbarasho. U buuxi arjiyo kala duwan carruurta ku nool cinwaanno kala duwan. Walaaluhu waa carruurta wadaagta hal ama labada waalid, dhalasho, guur ama korsashada, oo ay ka mid tahay walaalaha sida lagu qeexay dhaqanka qabaailka. Haddii walaalku uusan weli gaarin 3 sano jir Sebteember 1, waa inuu isna wakhtiga abaalmarinta ku jiro isla barnaamijka uu ku jiro Ilmaha Koowaad.

**Xasuusin:** Carruurta da'doodu tahay 5 ama ka weyn tahay marka la joogo Sebtember 1 ee sanadka maaliyadeedka hadda uma qalmaan inay helaan deeq waxbarasho.

## Ilmaha Koowaad

*Magaca Sharciga Ilmaha:____________________________________________

*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Taariikhda dhalashada ilmaha:______________________________

MM / DD / YYYY

*Jinsiga ilmaha (mid calaamadee): ☐ Lab ☐ Dhedig

Ilmahani ma ku jiraa xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care)? ☐ Haa ☐ Maya

Qowmiyadda Caruurta *(ikhtiyaari - mid calaamadee)*: ☐ Hispanic/Laatiin ☐ Aan ahayn Hispanic / Laatiin

Jinsiyadda *(ikhtiyaari ahaan - calaamadee dhammaan kuwa khuseeya)*:

☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ☐ Aasiyaan ☐ Madow ama Afrikan Amerikan

☐ Pacific Islander ama Native Hawaiian ☐ Caddaan

Ilmahani ma qaatay Baaritaankayga Caruurnimada Hore? ☐ Haa ☐ Maya

Goobta:______________________________ Taariikhda: ______________

## Caruur Intaas ka Badan

Miyaad u codsanaysaa caruur hal ilmo ka badan? ☐ Haa ☐ Maya

*Haddii aad u dalbanayso wax ka badan hal ilmo, isticmaal bogga dheeriga ah ee dhamaadka arjiga.*

## Macluumaadka Waalidka/Mas'uulka Sharciga

**Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee carruurta ku jirta arjigan waa inuu buuxiyaa qaybtan.**

**Ogoow:** Haddii ilmuhu uu ku jiro xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care), fadlan ka bood qaybtan oo buuxi qaybta "xanaanada kumeelgaarka ah".

*Magaca sharciga Waalidka/Mas'uulka:______________________________________________
*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Cinwaanka Deganaanshaha:______________________ Apt/Unit #:______________________

*Magaalada:______________________ *Gobolka:___ *ZIP:_______ Degmada:____________

*Waxa ay isu yihiin ilmaha: ☐ Waalid ☐ Mas'uulka Sharciga (oo magacawday maxkamaddu)
☐ Wax kale: ______________________________________________

Taariikhda Dhalashada *(*kaliya haddii waalidku ka yar yahay 21 jir, MM/DD/YYYY)*: ________________

Lambarka Taleefanka: ______________________ Cinwaanka Emailka: ______________________

Cinwaanka boostada (haddii ay ka duwan tahay cinwaanka degaanka):__________________________

Magaalada:______________________ Gobolka:______ ZIP:_______ Degmada:____________

## Xiriir Dheeraad ah Xiriirka 1

Haddii ay jiraan laba waalid/mas'uul oo sharci ah, waalidka labaad waa in lagu qoraa hoos. Marka aad qofkan hoos ku qorto, waxaad siinaysaa ogolaanshahaaga Barnaamijka Pathway II in uu la xiriiro qofkan qaangaarka ah si uu ugala hadlo macluumaadka ku qoran foomkan.

Magaca:__________________________________________________________
*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

Cinwaanka Deganaanshaha:______________________________ Apt/Unit #:__________

Magaalada:______________________ Gobolka:______ ZIP:__________ Degmada:__________

Lambarka Taleefanka:______________________ Cinwaanka Emailka:______________________

Waxa ay isu yihiin ilmaha/Caruurta:__________________________________________

## Xiriir Dheeraad ah Xiriirka 2

Ikhtiyaari: Haddii uu jiro xiriir kale sida xubin qoyska ah oo dheeri ah, shaqaalaha kiiska (case worker), shaqaale barnaamij, ama qof kale oo qaangaar ah oo aad rabto in lagu daro arjigaaga, halkan ku qor. Marka aad qofkan hoos ku qorto, waxaad siinaysaa ogolaanshahaaga Barnaamijka Pathway II in uu la xiriiro qofkan qaangaarka ah si uu ugala hadlo macluumaadka ku qoran foomkan.

Magaca:__________________________________________________________
*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

Cinwaanka Deganaanshaha:________________________________________ Apt/Unit #:____________

Magaalada:__________________________ Gobolka:______ ZIP:___________ Degmada:___________

Lambarka Taleefanka:___________________________ Cinwaanka Emailka:________________________

Waxa ay isu yihiin ilmaha/Caruurta:_________________________________________________________

## Macluumaadka Qoyska

**Luqadee ayuu qoyskaagu guriga ku hadlaa inta badan?** *Mid calaamadee.*

☐ Ingiriis ☐ Maang ☐ Soomaali ☐ Isbaanish ☐ Fiyetnaam

☐ Mid Kale: _______________________________________________________

**Ma u baahan tahay turjumaan?** ☐ Haa ☐ Maya

**Qoyskaaga ma la soo gudboonaaday mid ka mid ah xaaladaha nololeed ee soo socda mar ka mid ah 24kii bilood ee la soo dhaafay (oo ay ku jiraan hadda) dhibaatooyin dhaqaale ama hoyga/guri oo aad weydeen awgeed?** *Dooro kuwa kugu habboon.*

☐ Hoy kumeelgaar ah (Shelter) ☐ Kolba meel u guur guurayay

☐ Si ku meelgaar ah ula deganaa qaraabada ama asxaab kale

☐ Hoteel moteel ama tareelle ☐ Gaadhiga, banaanka, goobaha dadweynaha

**Waa maxay heerka ugu sarreeya ee waxbarasho ee aad dhamaysay? Calaamadee hal:**

☐ Wax ka yar dugsiga sare ☐ Dugsiga sare ama GED ☐ Xoogaa Kuliyada ama shahaado aan qaadan

☐ Shahaado kuliyadeed

**Maxay tahay xaaladdaada shaqo ee hadda? Calaamadee hal:**

☐ Wakhti buuxa shaqeeya (25 saacadood/toddobaadkii ama wax ka badan)

☐ Shaqeeya wakhti-dhiman (in ka yar 25 saacadood/toddobaadkii)

☐ Shaqo la'aan, shaqo raadinaya ☐ Shaqo la'aan, shaqo aan raadinaynin

**Sideed ku maqashay Deeqda Waxbarashada Carruurnimada Hore? Calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya.**

☐ Barnaamijkeyga

☐ Saaxiib/Qoyska

☐ Qoys kale oo ku jira barnaamijkayga

☐ Maamulaha Aagga

☐ Ilaha bulshada (tusaale ahaan, maktabada)

☐ Warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter)

☐ Daraasad/baaritaan khadka internetka

☐ Parent Aware/Child Care Aware

☐ Bixiyaha adeegyada Qabaa'ilka, Degmada, ama Gobolka

☐ Xaashi/xayeysiinta

☐ Meel kale:_________________________________________________

## Caddaynta u Qalmitaanka Dakhliga: Tilmaamaha

Qoysasku waa in ay u qalmitaankooda ku soo caddeeyaan laba siyaabood midkood:

**Xulashada 1 (Option 1):** Qoyska hadda ka qayb qaata mid ka mid ah barnaamijyada dowlada ee soo socda:

- Barnaamijka Maalgelinta Qoyska Minnesota (MFIP)
- Barnaamijka Lacagta Qadada laga Dhimay ama laga Dhaafay (FRLP)
- Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Geyiga Hindida
- Head Start
- Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caruurta (CCAP)
- Barnaamijka Cunnada ee Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP)
- Barnaamijka Taageerada Cuntada (SNAP)
- Xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care)

** Qoysasku uguma qalmaan deeqda waxbarashada iyadoo lagu salaynayo oo keli ah in ay u qalmaan barnaamijka CACFP. Qoysasku waa in ay xaq u yeeshaan iyadoo lagu salaynayo dakhligooda.*

**Caddaynta la aqbali karo ee caddaynaysa kaqayb qaadashada waxaa ka mid ah:** ogeysiiska rasmiga ah ee ku qoran warqada rasmiga ah ee barnaamijka; arji ku saabsan ogolaanshaha/Saxiixa barnaamijka (sida arjiga CACFP ama FRPL oo la aqbalay); foomka ogolaanshaha ee barnaamijka dadweynaha; biilka hadda ama rasiid barnaamijka (sida, biilka MEC 2 ee ka socda CCAP); ama sawir laga qaaday shaashadda diiwaanka rasmiga ah ee barnaamijka (sida, qiimaha qadada bilaashka ah ama qiimaha la dhimay ee Infinite Campus). Caddaynta ka qaybgalku waa in ay wadato magaca waalidka/mas'uulka iyo/ama ilmaha (carruurta), waa in taariikhaysan tahay, waana inay ansax ahaataa waqtiga abaalmarinta deeqda. **Caddaynta aan la aqbali karin waxaa ka mid ah:** warqada sugidda liiska, arji aan la ansaxin, dukumentiyada aan taariikhaysnayn, iyo/ama dukumeenti dhacay.

**Xulashada 2 (Option 2):** Haddii aadan ka qayb qaadanaynin ama aadan dukumiinti ka haysanin mid ka mid ah barnaamijyada ay maalgaliso dowlada dhexe ee lagu soo xusay Xulashada 1, markaa waa inaad soo buuxiso labada shax ee *Xulashada 2 (Option 2): Foomka Caddaynta/Xaqiijinta Dakhliga ee bogga* soo socda oo aad soo dirto cadaymo muujinaya dakhliga reerkaaga.

- **Shaxda tilmaamaha Caddaynta Dakhliga Qaangaarka,** ku qor dhammaan xubnaha qoyska oo dhan haddii wax la isu yahay iyo haddii aan la isu ahaynba (sida awoowe/ayeeyo, qaraabo kale, ama saaxiibo) kuwaas oo kula wadaaga dakhliga iyo kharashyada. Qofka arjiga buuxsanaya waa in la tiriyaa iyo dhammaan carruurta la nool. Qoyska kuma jiraan dadka kale ee na nool ee dhaqaale ahaan madax banaan sida qof qolka la degan oo kale (roommate).

- **Shaxda Tilmaamaha Ilmaha Qoyska:** Liiska ku qor dhammaan dhallaanka, carruurta, iyo ardayda dhigata illaa fasalka 12 ee qoyska ee wadaaga dakhliyada iyo kharashyada, xiitaa haddii aysan waxba isu ahayn. Ku soo lifaaq bog dheeraad ah haddii loo baahdo. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan cabirka qoyska, fiiri qaybta "Who is in a SNAP household" ee shabakada (website-ka) u qalmitaanka SNAP Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) (https://www.fns.usda.gov/snap).

**Ku soo lifaaq caddaymaha la aqbali karo ee dhammaan dakhliga qof kasta oo qaangaar ah ee ku qoran liiska,** kaas oo ay ku jiraan foomka W-2 ee sanadkii hore, labadii jeegagga mushaharka ugu dambeeyay, bayaannada gargaarka maaliyadeed (financial aid statement), ama caddayn ka timid loo-shaqeeyaha oo ku qoran waraaqda rasmiga ah ee shirkadda. Jeegagga dabadoodu waa in ay ku taariikhaysan yihiin lix bilood gudohoood xiliga abaalmarinta. Haddii nooc kale ee dukumeenti ah aan la heli karin, dukumentiyada xaraynta canshuurta sanadkii lasoo dhaafay ayaa la isticmaali karaa.

Dukumiintiyada canshuurtu waa inay noqdaan koobiga la saxiixay ee loo gudbiyo Internal Revenue Service (IRS) ama uu la socdo ogeysiiska xaqiijinta haddii si elektiroonig ah loogu diray. Soo raaci cadaynta dhammaan noocyada daqliga idin soo gala. Haddii qoysku uusan dakhli lahayn, mid ka mid ah dadka qaangaarka ah ee qoysku waa inuu soo buuxiyo *foomka Caddaynta Dakhli La'aanta (Household Declaration of No Income)* ee dhamaadka arjiga.
**Ogeysiis:** Codsiyada loogu talagalay walaalkiis cunug leh deeq waxbarasho firfircoon uma baahna inay soo gudbiyaan caddeynta u qalmitaanka dakhliga.

## Dukumentiyada Qoyska ee Muujinaya U-qalmitaanka

### Xulashada 1 (Option 1): Ka Qayb qaadashada Barnaamij Dowlada

**Hadda miyaad ka qayb qaadataa midna barnaamijyadan dowlada? Calaamadee dhamaan kuwa ku khuseeya**
Haddii aad hadda kaqayb qaadato midna barnaamijyada hoos ku qoran, waa inaad ku soo lifaaqdaa dukumiinti rasmi ah oo muujinaya in aad barnaamijkaas ka qayb qaadato si uu u muujiyo xaq u lahaanshaha:

- ☐ Barnaamijka Maalgelinta Qoyska Minnesota (MFIP
- ☐ Barnaamijka Lacagta Qadada laga Dhimay ama laga Dhaafay (FRLP)
- ☐ Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Geyiga Hindida
- ☐ Head Start
- ☐ Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caruurta (CCAP)
- ☐ Barnaamijka Cunnada ee Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn* (CACFP)
- ☐ Barnaamijka Taageerada Cuntada (SNAP)
- ☐ Xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care)

Haddii **aadan** hadda ka qayb qaadanin mid ka mid ah barnaamijyadan dowlada, waa inaad buuxisaa *Xulashada 2 (Option 2): Foomka Xaqiijinta Dakhliga* ee bogga soo socda oo soo dir dukumiintiyada dakhliga si dib loogu eego u qalmitaanka.

**Soo buuxi boggan** oo soo dir Caddaynta dakhliga oo ansax ah haddii aadan hadda ka qayb qaadanin barnaamijyada dowlada ee Xulashada 1 (Option 1). **Ka bood boggan** haddii aad hadda ka qayb qaadato mid ka mid ah barnaamijyada oo aad muujin karto caddayntiisa mid ka mid a Xulashada 1 barnaamijyada dadweynaha ee ku qoran bogga 5.

# Xulashada 2 (Option 2): Foomka Caddaynta Dakhliga (Income Verification Form)

## Qaangaarka Qoyska – Jaantuska Caddaynta Dakhliga (Adults in Household – Income Verification Chart)

| Qaan gaarka - Magaca dhammaystiran | Guud ahaan Mushaharka Shaqada Ha ku qorin mushahar saacadii ah. | | | | | Beer ama Iskii-u-Shaqayn | Masruufka Caruurta, Meherka | | | | | Dhammaan Dakhliga Kale | | | | | Dakhli aan Lahayn |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Ujeedada barnaamijkan, xubnaha qoyskaagu waa "Qof kasta oo kula nool oo kula wadaaga dakhliga iyo kharashyada, xitaa haddii aydaan wax isu ahayn."** Waxaad qortaa magaca buuxa ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan iyo dakhligooda (dakhliga) oo dhan doolar buuxa. Ku dar ardayda jaamacadda ee si ku meel gaar ah guriga uga maqan. *Haddii qof liiska ku qoran uusan lahayn dakhli, calaamadi laynka u dambeeya shaxda. Xasuusin: markaa kadib waxaad soo buuxinaysaa foomka Caddaynta Dakhli La'aanta (Self-Declaration of No Income) | Mushaharka guud ka hor inta aan wax laga jarin (maaha lacagta saafiga ee) ($) | Toddobaad kasta | Labadii Toddobaad mar | 2 jeer Bishii | Bil kasta | Dakhliga saafiga ah kadib kharashyada ganacsiga marka laga jaro. Ku qor haddii lagugu siiyo sanadle ama bil kasta. ($) | Lacagta kusoo gashay ($) | Toddobaad kasta | Labadii Toddobaad mar | 2 jeer Bishii | Bil kasta | Beeshin (Pension), shaqada ka fadhiistay (retirement), naafanimada, shaqo la'aanta, Lacagta la siiyo askartii hore, iwm. ($) | Toddobaad kasta | Labadii Toddobaad mar | 2 jeer Bishii | Bil kasta | Halkan calaamadi haddii qaangaarku uusan lahayn dakhli. |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |
| | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

## Caruurta Qoyska

| Magaca Koowaad ee Ilmaha | Magaca Dambe ee Ilmaha | Da'da Ilmaha | Ilmaha ku jira Xanaanada Kumeelgaarka ah (Foster Care): Haddii hay'ad ama maxkamad ay leedahay mas'uuliyada sharciga ah ee ilmaha, calaamadee goobada. |
|---|---|---|---|
| | | | ☐ |
| | | | ☐ |
| | | | ☐ |
| | | | ☐ |
| | | | ☐ |
| | | | ☐ |

Haddii aadan u codsanaynin ilmo ku jira adeega ilaalinta caruurta (protective services) ama daryeelka kumeelgaarka ah (foster care), ka bood boggan.

## Ilmaha ku jira Ilaalinta Caruurta (For a Child in Protective Services)

Haddii uusan ilmahaagu qaadanin adeega ilaalinta ilmaha (child protective services), dhaaf qaybta iyada oo banaan.

Hay'adda soo Gudbisay:________________________________Taariikhda:____________________________________

Waa Kee Shaqaalaha soo Gudbiyay: _____________________Magaca Shaqada Shaqaalaha Soo gudbiyey: ______

Lambarka Taleefanka:____________________ Cinwaanka Emailka:________________________________________

## Macluumaadka Daryeelka Kumeelgaarka ah (Foster Care)

**Qaybtan waa inay soo buuxiso shaqaalaha hay'ada adeega bulshada ee degmada ama qabaailku.**

Marka aad buuxiso qaybtan waxaad adigu isu xilqaamaysaa in aad Maamulaha Nawaaxiga u tahay qofka uu la xidhiidhi lahaa haddii loo baahdo in laga hadlo wax ku saabsan macluumaadka foomkan ku qoran. Shaqaalaha Hay'adda adeega bulshada degmada ama qabaailku waa inuu ogeysiiyaa Maamulaha Aagga wixii isbedel ah oo saamayn ku yeelan kara deeqda waxbarasho ee ilmaha. Dhamaadka arjiga, shaqaalaha hay'adda adeega bulshada ee degmada ama qabaa'ilku waa inay u saxiixaan waalid ahaan/mas'uul ahaan.

Hay'adda adeega bulshada degmada ama qabaailka______________________________________________

Cinwaanka hay'adda adeega bulshada degmada ama qabaailku:___________________________________

Magaca Shaqaalaha:_____________________________________________________________________

Lambarka Taleefanka: ______________________ Cinwaanka Emailka: ____________________________

### Goobta Degenaanshaha Ilmaha

Cinwaanka Degaanka ee Hadda:_____________________________________ Apt/Unit #:_______________

Magaalada: ________________________ Gobolka:____ ZIP:___________ Degmada______________

**Degmada Iskuulka Degaanka** ilmaha oo ku salaysan cinwaanka guriga laga soo saaray ilmaha:

_____________________________________________________________________________________________

### Xiriirka Waalid Daryeelka Ku Meelgaarka ah (Foster Care)

Magaca Waalidka xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care Parent):

______________________________________________________________________

*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

Lambarka Taleefanka:_________________________ Cinwaanka Emailka:_______________________________

# Heshiiska u Hogaansanaanta Shuruudaha
## (Agreement to Comply with Requirements)

Marka aad saxeexdo arjigan, waxaad xaqiijineysaa inaad akhriday, fahamtay oo aad ogolaatay shuruudaha Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Waxbarashada Waqtiga Hore iyo waxyaabaha hoos ku taxan.

- Macluumaadka arjiga ku qoran waa run, oo dhammaan dakhliga xubnaha qoyska waan soo sheegnay. Haddii aan si ulakac ah idiin siiyo macluumaad been ah, cunugayga ayaa laga yaabaa inuu waayo deeqda waxbarasho waxaanan ubaahan karaa inaan u soo celiyo gobolka lacagtii hore la iiga bixiyay.
- **Ilmahayga 3-illaa 5-sano** jirka ah waa inuu ku qaato Baarista Caafimaadka ee Caruurnimada Hore 90 maalmood gudahood ka dib marka uu bilaabo ka qaybgalka barnaamij aan doorto anigoo adeegsanaya deeq waxbarasho. Haddii ilmahaygu helo deeq waxbarasho inta u dhaxaysa da'da 0 iyo 2, waa in uu ku qaato baaritaanka caafimaadka 90 maalmood gudahood maalinta uu gaaro dhalashada saddexaad.
- Ilmahaygu wuxuu sii ahaanayaa mid u qalma inuu helo deeq waxbarasho illaa bisha Agoosto 31 sanadka uu da' ahaan uqalmo kindergarten, ama uu 5 sano jir yahay ugu dambayn Sebteember 1, illaa inta ay maalgelinta gobolku lacag u hayso.
- Waxaan ku wargalin doonaa Barnaamijka Pathway II marka ilmahaygu joojiyo aadista barnaamijka aanu ku isticmaaleyno deeqda waxbarasho.
- Waxaan ogaysiin doonaa Barnaamijka Pathway II haddii aan guuro ama macluumaadka la igala soo xidhiidho uu isbedelo.
- Si joogto ah oo isku xig xigta in ilmuhu u aado ayaa la iga filayaa. Deeqaha Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore ma bixin karto wax ka badan 25 maalmood oo maqnaansho ah, 10 maalin oo xirnaansho la qorsheeyey ah iyo 11 feestooyinka barnaamijka ah. Maalmaha maqnaanshaha ee ka badan 25 ma bixin doonto deeqda waxbarasho oo kharashyada waa inaan anigu ka bixiyaa jeebkayga aan ka ahayn haddii aan ka dhaafitaan rasmi ah aan loo fidinin ilmahayga.
- Haddii barnaamijku mar dambe uusan kasii qeybqaadanaynin Parent Aware, ma awoodi doono inaan barnaamijkaas ku sii isticmaalo Deeqda Waxbarashada waqtiga hore.
- Haddii aan ahay bixiye daryeelka haynta ilmaha oo aan ka qaybqaadanayo Parent Aware, waxaan fahamsanahay in aanan awoodi karin inaan ku isticmaalo deeqda Waxbarashada Waqtiga Hore ee Ilmahayga xaruntayda daryeelka carruurta ee shatiga leh.

## Ogolaanshaha Loo Baahan Yahay Inaan Wadaagno Macluumaadkaaga

Waa inaad oggolaato dhammaan weedhahan soo socda si aad uga qayb gasho barnaamijka deeqda waxbarasho.

- Maamulaha Deeqda Waxbarasho /Maamulaha Nawaaxigu wuxuu barnaamijka aan doorto la wadaagi doonaa magaca, cinwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga ilmahayga, iyo magacayga iyo cinwaankayga sida ay ugu qoranyihiin arjiga, iyo sidoo kale tirada lacagta deeqda waxbarasho ee uu ilmahaygu u qalmo iyo taariikhda lasiiyey deeqda waxbarasho. Tan waxaa loo baahan yahay si loo hubiyo saxsanaanta udhaxeysa arjiga iyo macluumaadka uu hayo barnaamijku.
- Maamulaha Deeqda Waxbarasho /Maamulaha Nawaaxigu waxay la wadaagi karaan magaca, cinwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga ilmahayga, iyo magacayga iyo cinwaankayga sida ku qoran liistada, (1) degmada dugsiga ee degaanka, ujeedada oo ah in ilmahayga loo sameeyo Lambarka Aqoonsiga Ardayga (Statewide Student Identification SSID) si Maamulaha Deeqda Waxbarasho/Nawaaxiga uu u isticmaalo,

iyo (2) Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) si loo aqoonsado cunugayga loona ansixiyo bixinta lacagaha deeqda waxbarasho.

- Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education MDE) ayaa laga yaabaa inay la wadaagaan macluumaadka ku saabsan aniga iyo cunugayga/ilmahayga u-qalmitaanka iyo isticmaalka deeqaha waxbarasho hay'adaha iyo barnaamijyada kale oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidneyn: Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caruurta (CCAP), shaqaalaha wakaaladda bulshada ama hay'adda bulshada qabaailka (Tribal social agency workers), MFIP, SNAP, Head Start, barnaamijka lacagta qadada laga dhimay ama laga Dhaafay (FRPL), iyo barnaamijka cunnada ee daryeelka ilmaha iyo dadka waaweyn (CACFP). Hay'adahani waxay kaloo Waaxda Waxbarashada Minnesota la wadaagi karaan macluumaadka ku saabsan aniga iyo cunugayga u-qalmitaankiisa iyo isticmaalka caawimada. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali karaa si loo xaqiijiyo xaq u yeelashada dakhliga qoyska ee deeqaha waxbarasho iyo in la kormeero isticmaalka deeqaha waxbarasho iyo barnaamijyada kale ee gargaarka dadweynaha. Waxaan fahamsanahay in ogolaanshahayga wadaagidda macluumaadku sii shaqaynayo lix bilood ka dib marka ay dhamaato deeqda waxbarasho.
- Maamulaha Deeqda Waxbarasho/ Maamulaha Nawaaxiga ayaa laga yaabaa inay macluumaadka arjiga la wadaagaan MDE oo ay ku jiraan magaca iyo cinwaankayga; macluumaadka dadweynaha (demographic); waxbarashada waalidka; macluumaadka dakhliga; u-qalmitaanka ilmahayga iyo xaddiga Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore; barnaamijka aan ku isticmaalayo deeqda waxbarasho; lambarka SSID ee ilmahayga; iyo haddii aan u hoggaansamey shuruudaha barnaamijka. Macluumaadkan waa loo baahan yahay si la hubiyo u-qalmitaanka, hirgelinta barnaamijka, waxaa uuna lagama maarmaan u yahay si loo waafajiyo sharciga gobolka ee ogolaanaya barnaamijka.
- Si loo hubiyo in baaritaanka carruurnimada hore la sameeyey, Maamulaha Deeqda Waxbarasho/ Maamulaha Aagu wuxuu haystaa ogolaanshahayga inuu la xiriiro xafiiska dugsiga degmada ee ilmahayga si uu u xaqiijiyo goobta iyo taariikhda baaritaanka.

***Ogoow:*** *Qasab iguma aha in aan ogolaado in aan idin la wadaago macluumaadkayga, laakiin haddii aan diido (aana idinla wadaagin), waxaan fahamsanahay in cunugayga/carruurtaydu ayna u qalmi doonin inay helaan Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore. Macluumaadka la wadaagi doono kuma jiraan dukumiintiyada taageeraya ee ku lifaaqan arjigan.*

# Digniinta ururinta arrimaha asturan (Tennessen Warning) ee ka timid Waaxda Waxbarashada Minnesota

Ogaysiiskani wuxuu khuseeyaa dhammaan macluumaadka lasoo ururiyey ee barnaamijka Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore. Waxay sharaxaysaa macluumaadka aan soo ururineyno iyo sababta aan u ururineyno.

**Macluumaad noocee ah ayaan codsaneynaa?**

Waxaan codsaneynaa dhammaan macluumaadka ku saabsan Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore - ee arjiga barnaamijka Pathway II, oo qaarkeed loo tixgeliyo in ay tahay xog gaar ah sida uu dhigayo sharciga Minnesota.

**Maxaan kuu weydiineynaa Macluumaadkan?**

Macluumaadka ku saabsan arjigan waa loo baahan si loo codsado Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore. Waxaan isticmaali doonnaa macluumaadka halkan ku urursan, iyo wixii macluumaad dheeraad ah ee la xidhiidha, si loo go'aamiyo u-qalmitaanka maalgelinta. Macluumaadkani waa lagama maarmaan si loogu hogaansamo sharciga gobolka ee ogolaanaya barnaamijka.

**Miyaa la iga rabaa inaan bixiyo macluumaadkan?**

Ma jiro waajib sharci oo lagaaga rabo inaad bixiso xogta la codsaday; Si kastaba ha ahaatee, iyada oo aan lahaynin xogtan, ma ogaan karno u-qalmitaanka ilmahaaga markaa ilmahaagu ma heli doono deeq waxbarasho.

**Yaa kale oo arki kara macluumaadkan?**

Sida lagu sharaxay meelo kale oo arjigan ah, ogolaanshaha oo aad bixisay waxaanu macluumaadkaaga la wadaagi doonaa barnaamijka aad dooratid, dugsiga degmada degaankaaga, iyo Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Haddii aad bixiso ogolaanshahaaga ikhtiyaariga ah, cid saddexaad oo dhinac ah ayaa isticmaali doonta macluumaadkaaga marka la qiimeynayo waxtarka barnaamijka deeqda waxbarasho ee gobolka. Dhammaan hay'adahaas, oo ay ku jiraan qiimeeyaha, waxaa celinaya sharciga dhowrista xogta iyo xogta qarsoodiga ee Minnesota, mana wadaagi doonto macluumaadkaaga gaarka ah marka laga reebo sida lagu sharaxay halkan iyo qaybta ogolaanshaha. Qiimeeyahu waa inuusan cidna la wadaagin xogtaada marka laga reebo MDE.

Waxaan sidoo kale siin karnaa macluumaadka aad nasiisay Hanti-dhowraha Sharci dejinta, Waaxda Adeegyada Bulshada ee Minnesota, iyo/ama hay'adaha kale ee leh awood sharci si ay u helaan macluumaadka, ama qof kasta oo ay maxkamaddu u amartay.

**Sidee kale oo loo isticmaali karaa macluumaadkan?**

Waxaan u isticmaali karnaa ama u siideyn karnaa macluumaadkan oo kaliya sida ku xusan ogeysiiskan, haddii aadan na siinin ogolaansho qoraal ah si aan u siideyno macluumaadkan si hab kale loogu isticmaalo ama aan u siino qof kale ama hay'ad kale. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali karaa ulajeedo kale haddii Aqalka Xildhibaanada (Congresska) ama Sharci dejinta Minnesota ay soo saarto sharci u ogolaanaya ama u baahan in si kale loo isticmaalo.

**Intee in le'eg ayaa xogtayda la hayn doonaa?**

Xogtaada waxaa la hayn doonaa ugu yaraan todoba sano.

## Ogolaansho Ikhtiyaari ah: Bixi Macluumaadka oo Ka Qaybqaado Qiimeynta

Fadlan ku qor xarfaha magacaaga u horeeya si aad u xaqiijiso inaad akhriday, fahamtay oo aad ogolaatay kuwa soo socda.

_____Maamulaha Deeqda Waxbarasho/ Maamulaha Nawaaxiga ama MDE ayaa laga yaabaa inay wadaagaan macluumaadka arjigayga, cunugayga u-qalmitaankiisa iyo caddadka Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Waqtiga Hore ee uu helo, iyo barnaamijka aan u isticmaalayno deeq-lacageedka, iyo qiimeeyeyaasha barnaamijka ay MDE ogoshahay ujeedooyin la xidhiidha falanqaynta (analyze) habka maalgelinta loo isticmaalo, sida qoysaska loo ogeysiiyo barnaamijka, saamaynta barnaamijku ku leeyahay horumarka ilmaha ama u diyaar garowga dugsiga, tayada barnaamijyada waxbarashada hore ee goobaha deeqda waxbarasho lagu isticmaalo, iyo qiimeeyaha kale ee loo arko inay khuseyso MDE. Warbixinta dadweynaha loo soo bandhigayo kuma jiri doonto macluumaad gaar ah oo lagu aqoonsado ilmo gooni ah.

## Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka Sharciga ah

Marka aad hoos saxeexdo waxaad ogolaatay oo xaqiijineysaa dhammaan waxyaabaha soo socda:

1. Waxaan xaqiijinayaa in aan ahay waalidka sharciga ama mas'uulka sharciga ah, dhamaan macluumaadka ku qoran arjigan waa run, dakhliga dhamaan qaangaarka qoyskana waan soo gudbinay. Waxaan fahamsanahay in haddii aan si ulakac ah idiin siiyo macluumaad been ah, cunugayga ayaa laga yaabaa inuu waayo deeqda waxbarasho waxaanan ubaahan karaa inaan u soo celiyo gobolka lacagtii hore la iiga bixiyay.
2. Waxaan ogolahay shuruudaha barnaamijka lagu sharaxay bogga Heshiiska u Hogaansanaanta Shuruudaha (Agreement to Comply with Requirements).
3. Waxaan ogolahay in la wadaago macluumaadkayga iyo/ama macluumaadka ilmahayga sida lagu sharaxay bogga Ogolaanshaha loo baahanyahay Si loo Wadaago Macluumaadkaaga (Required Consent to Share Information).
4. Waxaan ogolahay in aan akhriyay oo aan fahmay Digniinta Tennessen.

**Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka Sharciga ah**

Saxiixu waa in uu qalin khad buluug/madow ah ama elektanoonik ahaan yahay, oo uusan ahayn qalin qori.

*Magaca sharciga Waalidka/Mas'uulka:________________________________________

*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Saxiixa:______________________________ *Taariikhda:______________________

*MM/DD/YYYY*

**Saxeexa Waalidka Labaad - (ikhtiyaari, aan loo baahnayn)**

Magaca sharciga Waalidka/Mas'uulka:________________________________________

Saxiixa:______________________________ Taariikhda:______________________

*MM/DD/YYYY*

U soo dir arjigaaga dhameystiran iyo dukumintyada u qalmitaanka barnaamijkaaga Pathway II.

## Saxiixa Wakiilka Barnaamijka/Taariikhda Xaqiijinta Deeqda

Waxaan qirayaa in macluumaadka loo baahan yahay ee ku saabsan *Arjiga Deeqda Waxbarashada Waqtiga hore - Pathway II* aan dib u eegay oo u ansixiyay inuu run u yahay ujeedada abaalmarinta deeqda waxbarasho ee Pathway II ee barnaamijkeena. Waxaan kale oo aan qirayaa in aan qoyska kala hadalnay xulashada iyo fursadaha deeqda waxbarashada waqtiga hore iyo in ay barnaamijkeena ka aqbaleen deeqda waxbarasho ee Pathway II.

*Magaca Wakiilka Barnaamijka:______________________________________________

*Magaca Hore* *Magaca Dambe*

*Saxeexa:________________________________ *Taariikhda:____________________

*Taariikhda Xaqiijinta Deeqda MM/DD/YYYY*

*Magaca Barnaamijka Pathway II:____________________________________________

*Magaca Xarunta (haddii uu jiro):____________________________________________

| | | | |
|---|---|---|---|
| *Ilmaha 1 Taariikhda Ay Bilaabanayso Deeqdu: | | * Ilmaha 1 Tirada Lacagta Deeqda: | |
| Ilmaha 2 Taariikhda Ay Bilaabanayso Deeqdu: | | Ilmaha 2 Tirada Lacagta Deeqda: | |
| Ilmaha 3 Taariikhda Ay Bilaabanayso Deeqdu: | | Ilmaha 3 Tirada Lacagta Deeqda: | |

Haddii aad u dalbanayso wax kabadan hal ilmo, ku liis garee halkan oo ku soo lifaaq boggan *arjigaaga Deeqda Waxbarashada* ee *Waxbarashada Waqtiga Hore - Pathway II.* Mar kale halkan ha ku qorin macluumaadka Ilmaha Koowaad (Child One) ee ku qoran bogga 1 ee arjiga. Haddii aad u dalbanayso wax ka badan saddex caruur ah, boggan koobi ka samee oo xaashiyaha dheeraadka ah kusoo lifaaq arjigaaga.

## Ilmaha Labaad

*Magaca Sharciga Ilmaha: ______________________________________________
*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Taariikhda dhalashada ilmaha: ______________________________
MM / DD / YYYY

*Jinsiga ilmaha (mid calaamadee): ☐ Lab ☐ Dhedig

Ilmahani ma ku jiraa xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care)? ☐ Haa ☐ Maya

Qowmiyadda Caruurta *(ikhtiyaari - mid calaamadee)*: ☐ Hispanic/Laatiin ☐ Aan ahayn Hispanic / Laatiin

Jinsiyadda *(ikhtiyaari ahaan - calaamadee dhammaan kuwa khuseeya)*:

☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ☐ Aasiyaan ☐ Madow ama Afrikan Amerikan

☐ Pacific Islander ama Native Hawaiian ☐ Caddaan

Ilmahani ma qaatay Baaritaankayga Caruurnimada Hore? ☐ Haa ☐ Maya

Goobta: ______________________________ Taariikhda: ____________

## Ilmaha Saddexaad

*Magaca Sharciga Ilmaha: ______________________________________________
*Magaca Koowaad* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Taariikhda dhalashada ilmaha: ______________________________
MM / DD / YYYY

*Jinsiga ilmaha (mid calaamadee): ☐ Lab ☐ Dhedig

Ilmahani ma ku jiraa xanaanada kumeelgaarka ah (Foster Care)? ☐ Haa ☐ Maya

Qowmiyadda Caruurta *(ikhtiyaari - mid calaamadee)*: ☐ Hispanic/Laatiin ☐ Aan ahayn Hispanic / Laatiin

Jinsiyadda *(ikhtiyaari ahaan - calaamadee dhammaan kuwa khuseeya)*:

☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ☐ Aasiyaan ☐ Madow ama Afrikan Amerikan

☐ Pacific Islander ama Native Hawaiian ☐ Caddaan

Ilmahani ma qaatay Baaritaankayga Caruurnimada Hore? ☐ Haa ☐ Maya

Goobta: ______________________________ Taariikhda: ____________

Haddii qoysku uusan dakhli lahayn buuxi *foomka Caddaynta Dakhli La'aanta (Household Declaration of No Income)* oo kusoo lifaaq arjigaaga *Deeqda Waxbarashada Waqtiga Hore – Pathway II.*

## Caddaynta Dakhli La'aanta Qoyska (Household Declaration of No Income)

Qoraalkan hoos ku xusan wuxuu u taaganyahay in aad caddaynayso in uusan qoyskaagu dakhli lahayn ee Xulashada 2 (Option 2). Foomkan waa inuu buuxiyo isla waalidkii ama masuulka sharciga ah ee saxeexaya *Arjiga Deeqda waxbarashada ee waxbarashada waqtiga hore – Pathway II.*

**Aniga oo ah, ______________________________________________, waxaan caddaynaya in anaga qoys**

*Qor magaca sharciga ah oo dhammaystiran*

**ahaan aanan hadda lahayn dakhli maalintan oo ay taariikhdu tahay ___________________________.**

*taariikhda: MM/DD/YYYY*

**Saxeexa**:_______________________________________ **Taariikhda**:_________________________

*MM/DD/YYYY*